



Shaqada Wanaagsan ee Greater Manchester Axdiga Shaqada

Dulmarka Dukumiintiga loogu talagalay Turjumaadda

Supported by



GMCA GREATER
MANCHESTER
COMBINED
AUTHORITY

ANDY BURNHAM
MAYOR OF
GREATER
MANCHESTER

Dulmarka Dukumiintiga iyo Ujeeddada

Dukumintigan wuxuu soo bandhigayaa Axdiga Shaqada Wanaagsan ee Greater Manchester (Greater Manchester Good Employment Charter), isagoo qeexaya ujeeddooyinkiisa, heerarkiisa, sifooyinkiisa, iyo hannaanka shaqobixiyeyaasha raadinaya inay ku lug yeeshaan dhaqdhaqaaqa. Wuxuu markaa daboolayaa Ballanqaadka Taageeraha iyo Shuruudda Xubinnimada ee shaqobixiyeyaasha raadinaya inay isku diiwaangeliyaan Taageerayaal ahaan si ay mar dambe u noqdaan xubin ka mid ah Axdiga.

Axdiga Shaqada Wanaagsan ee Greater Manchester

Axdiga Shaqada Wanaagsan ee Greater Manchester waa qorshe si ikhtiyaari ah loogu soo biiro iyo abaabul qiimeyn kaasoo loo sameeyay inuu gacan ka geysto gaarsiinta dadka fursadaha shaqooyinka wanaagsan si horusocod iyo horumar loo gaaro, oo ay weheliso kobaca dhaqaale oo wax-soo-saar leh. Axdiga wuxuu higsanayaa inuu wanaajiyo heerarka shaqaaleynta ee dhammaan shaqobixiyeyaasha GM iyadoo aan la eegeynin baaxadda, waaxda ama goobta. Axdiga wuxuu leeyahay seddex heerar oo kaqaybgal oo loogu talagalay shaqobixiyeyaasha, Taageerayaasha, Xubnaha, iyo U-doodeyaasha.

Shaqobixiyeyaasha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay iska diiwaangeliyaan Axdiga – iyagoo muujinaya ballanqaad muuqda oo xagga shaqada wanaagsan ah, helitaanka Shabakada Taageerayaasha ee taageerada filka ah, munaasabadaha iyo munaasabadaha onlaynka, iyo kheyraadka badan ee sii kordhaya si looga caawiyo shaqobixiyeyaasha inay wanaajiyaan toddobada sifooyin ee shaqada wanaagsan ee lagu qeexay Axdiga: shaqo sugan, shaqo dabacsan, mushaarka dhabta ah ee lagu noolaado, kaqeybgalinta iyo codka, shaqaaleysiinta, maamulida dadka iyo caafimaadka iyo fayoaqabka

Axdigu wuxuu aqoonsan yahay in shaqada wanaagsan ay tahay safar, aysan ahayn halka loo socdo. Wuxuu taageeraya shaqobixiyeyaasha meel kastoo ay safarka kaga jiraan – ha ahaato ballanqaadida kor-u-qaadista heerarka, horumarinta shaqo wanaagsan, kor-u-qaadista habdhaqano dheeraad ah, ama tababarida dadka kale inay sidaas oo kale sameeyaan.

Ballanqaad

Noqo Taageeraha Axdiga si aad u sameyso ballanqaad qoraal ah oo muujinaya halka habdhaqannadaadu hadda kaga jiraan toddobada sifooyin ee shaqada wanaagsan iyo sida aad u qorsheyneyso inaad u wanaajiso. Si aad uga qeybqaadato Taageere ahaan uma baahnid inaad buuxisid dhammaan shuruudaha sifooyinka, balse waa inaad ballanqaadaa hagaajinta wanaajinta iyaga oo dhan.

Horumari

La hawlgal Shabakada Taageerayaasha Axdiga adigoo ka qeybgalaya munaasabadaha loogu talagalay in lagu soo bandhigo waxyaabo kala duwan oo shaqo wanaag ah, lagu baro qoddobo la taaban karo oo ay fududahay in la dhaqangeliyo, oo ku boori naftaada habdhaqanka hal-abuurka iyo faa'iidooyinka la xaqiijiyay leh. Ku dadaal inaad ku biiriso shaqo wanaaga dhammaan sifooyinka Axdiga adigoo helaya kheyraadka iyo adeegyada taageerada kuwaasoo ay heli karaan Taageerayaasha GM guud ahaan, loogu talagalay shaqo-bixiyeyaasha iyadoo ku xiran cabirkooda, waaxdooda ama goobtooda.

Kor-u-qaad

Dhammaan shaqobixiyeyaashu waxay ku bilaabaan safarkooda Taageere ahaan, kadib waxay u gudbi karaan heerka Xubnimo iyagoo buuxinaya shuruudaha loo dejiyey dhammaan toddobada sifooyin ee shaqada wanaagsan. Inkastoo buuxinta shuruudaha xubinnimada ay caddayn u tahay habdhaqannada wanaagsan ee shaqaaleysiinta, haddana ma aha dhammaadka safarka waxaana xubnaha laga filayaa inay sii wadaan inay sare u qaadaan habdhaqannada kujira sifooyinka. Xubnaha cusub waxaa soo jeedin doonna Qeybta Axdiga (Charter Unit).

Tababar

Shakhsiyaadku waxay noqon karaan U-doodeyaasha Axdiga iyagoo u wadaagaya khibradooda sifooyinka shaqada wanaagsan tababar ahaan oo taageeraya ujeeddada Axdiga si loo horumariyo heerarka shaqada guud

ahaan GM iyadoo lala kaashanayo shaqobixiyeyaasha. U-doodeyaashu waxay ka imaan doonaan ururo baaxad, waax, ama goob kasta joogaan.



Ballanqaadka Taageeraha Axdiga

Ballanqaadyada hoose ayaa qeexaya heerarka ugu hooseeya ee laga filayo Taageeraha Axdiga guud ahaan toddobada sifooyin ee shaqada wanaagsan. Taageerayaasha Axdiga waxay wadaagaan himilooyin loogu abuurayo shaqooyin wanaagsan dadka oo dhan oo leh fursado dhab ah si looga caawiyo dadka inay horusocdaan, horumaraan oo gacan ka geystaan dhaqaalahayaga gobolka ee kobcaya.

Shaqobixiyeyaasha waxaa laga filayaa inay si buuxda u taageeraan oo uga shaqeeyaan wanaajinta habdhaqannadooda ku aadan sifooyinka shaqada wanaagsan – sifooyinka waxay qeexeen waxa habdhaqanka shaqada wanaagsan, kaqeybgalinta shaqaalaha ee wax-ku-oolka ah iyo shaqada wanaagsan iyo shaqada cadaaladda ah sida ay u muuqdaan. Kuwaani waa kuwo firfircoon oo isbeddeli doonaan marka ururro badan ku lug lahaadaan oo habab kala duwan loo aqoonsado.

Bixinta Shaqo Sugaan

Waxaan ballanqaadaynaa inaan siinayno shaqaalahayagu sharraxaad ku saabsan saacadaha ay shaqeeynayaan iyo inaysan isticmaalin noocyada shaqo ee aan aan sugneyn, si ay si dheeraad ah ugu aamin qabaan dakhligooda oo si fudud ugu maarayn karaan ballanqaadyadooda shaqo iyo kuwa aan shaqada khuseynin.

Bixinta Shaqo dabacsan

Waxaan siin doonaa shaqaalaha fursad ay ugu shaqeeyaan si dabacsan marka walba ay suurto gal tahay, innagoo siinayno fursado ballaaran oo loo siman yahay, abuurayno goob shaqo oo kala-duwanaasho ka jirto oo loo dhan yahay kana naga caawinayso sidii aan si fiican uga faa'iideysan lahayn xirfadaha iyo hibbada shaqaalahayaga.

Ka-shaqeynta Bixinta Mushaarka Dhabta ah ee Lagu Noolaado

Si shaqaalahayagu ay u gaari karaan heer nolol oo hufan iyo inaan, shaqobixiyeyaashu ahaan, aan ka faa'iidayso karno shaqo ku haynta iyo kaqeybgalinta shaqaalaha, iyadoo dhimista ka dhalata, aan ku bixin doono ama ka shaqeyn doonno gaarista bixinta mushaarka dhabta ah ee nolol ee laga dhigay heerka ay ku taliyeen Mu'asasada Mushaarka Lagu Noolaado (Living Wage Foundation).

Wanaajinta Kaqeybgalinta & Codka Goobta Shaqada

Si shaqaalahayagu ay si buuxda gacan uga geysan karaan jihada iyo guusha ururkayaga ayna u qaabeeyaan karaan kaalintooda, iyadoo ururrada shaqaalaha ee la aqoonsan yahay ay fududeynayaan muujinta codka shaqaalaha wadajirka ah marka ay suurogal tahay, dhisidda waxqabadka kaqeybgalinta shaqaalaha ee wax-ku-oolka ah iyo taageerada laga helo ururrada xirfadaha ee la xiriira.

Horumarinta Habdhaqanno Shaqaalaysiin oo Heer Sare ah

Si shaqobixiyeyaal ahaan aan si buuxda uga wada faa'iideysan karno kala duwanaanshaha iyo hibooyinka ay leeyihiin bulshooyinka Greater Manchester oo dhan innagoo adeegsanayna daahfurnaan, nidaam loo wada dhan yahay oo caddaalad ah, ka qeybgalinta dugsiyada, bixiyeyaasha waxbarashada dheeraadka ah iyo waxbarashada sare iyo barnaamijyada shaqada, innagoo hubinayna in shaqaalahayaga ay haystaan fursado si ay had iyo jeer u hor ugu socdaan oo u isticmaalaan xirfadahooda iyo khibradahooda.

Wanaajinta Maamulida Dadka

Waxaan qiimeynaa dhammaan shaqaalahayaga waxaana sameyn doonaa goobo shaqo oo caddaalad ah oo loo wada dhan yahay, innagoo maalgalinayno tababarka iyo horumarinta shaqaalaha, iyo innagoo boorinayno oo dhiirogelinayno shaqaalaha si loo hubiyo inaan nahay urur guuleystay oo si heer sare ah wax u qabta.

Kobcinta Caafimaadka & Fayoqabka Shaqaalaha

Waxaan taageeranaa caafimaadka maskaxda iyo jirka ee shaqaalahayaga oo dhan, oo ay ku jiraan shaqo u sixitaanka dadka qaba cudurrada raaga iyo dadka laxaadka la', bixinta goobo shaqo oo caafimaad iyo badqab heer sare ah leh, oo sidaas awgeed dhimayo kharashka maqnaanshaha oo keenayo faa'idooyinka shaqaalaha kala duwan ee dheeraadka ah.

Shuruudda Xubinnimada Axdiga

Shuruudaha hoose ayaa qeexaya heerarka ugu hooseeya ee laga filayo Xubinta Axdiga guud ahaan toddobada sifooyin ee shaqada wanaagsan. Heerarka waxaa mideeya mabaadi'da u oggolaanaya sinnaanta, kala duwanaanshaha iyo ku-biirinta. Waxaa la sameeyay iyadoo loo maray hanaan wada wax-soo-saar si loo dejiyo himilooyin heer sare ah hadana bixiya dabacsanaan si loo hubiyo in Ishaqobixiyeyaashu dhammaan waaxyada iyo nooc kasta ay yihiin ay qayb ka noqon karaan dhaqdhaqaaqa Shaqada Wanaagsan ee Greater Manchester.

Shaqo Sugaan

Xubnaha Axdiga waxaa laga fili doonaa inay keenaan caddeyn muujineysa in shaqaaluhu ay ku aamin qabaan dakhligooda oo ay u maareeyn karaan howlahooda shaqo iyo kuwa aan shaqada la xiriirin si sahlan iyadoo loo marayo:

- Qandaraasyo ka tarjumaya saacadaha dhabta ah ee la shaqeeyay, oo ay ku jirto awoodda qandaraasyada dib-u-eegis loogu sameeyo oo loo saxo haddii saacadaha dhabta ah si joogto ah ay uga bataan saacadaha heshiiska, iyadoo qandaraasyada saacadaha ugu yar ee la shaqeeyo leh ugu dambeyntii kaliya la siiyo dadka doonayaan. Dib-u-eegista ayaa dhici doonta kadib 12 toddobaad marka la shaqeeyo kadibna lixdii biloodba mar.
- Tirada ugu yar ee saacadaha lagu damaanad qaaday xayeysiinta iyo sharraxaadda shaqada ee door kasta oo aysan ka reebaneyn qandaraasyada saacadaha ugu yar ee la shaqeeyo leh.
- Marka shaqobixiyuhu siiyo saacado dheeraad ah shaqaale saacad ku shaqeeyo, waxay bixiyaan afar toddobaad oo ogeysiis ah oo waqtiyada ay shaqeyn doonaan (si ay u caawiyaan qorsheynta qoyska) oo ballanqaadaan inay dadka siiyaan mushaarka saacadahaas haddii ay dhacdo in la joojiyo. [Tani kama hor-istaagayso shaqobixiyaha siinta saacado shaqaalaha marka lagu daro saacadaha heshiiska ee wata in ka yar afar toddobaad oo ogeysiis ah.]
- Kadib 12 toddobaad oo shaqo joogto ah oo door ka ah, shaqaalaha hay'adda waxaa la siiyaa isla mushaarka iyo shuruudaha shaqaalaha tooska ah. Kadib 12 toddobaad kadibna lixdii biloodba mar, tixgelin rasmi ah ayaa la siiyaa hay'ada shaqasiinta iyo xubnaha shaqaalaha kumeelgaarka ah waxaa la siiyaa boos joogto ah.

Shaqo dabacsan

Xubnaha Axdiga waxaa laga fili doonaa inay keenaan caddeyn awood u siineysa shaqaale aad u dabacsan oo si loo helo xirfado iyo hibo kala duwan:

- Naqshadeynta shaqooyin dabacsan marka ay suurtagal tahay:
 - Halka dadku ka shaqeeyaan (ku shaqeynta guriga; xafiisyo kala duwan; ku shaqeynta goob aan xafiis ahayn);
 - Marka dadku shaqeeyaan (bilow ama dhammaad dabacsan, dabacsanaan sannadle ah; saacado la isku geeyay; shaqo mashruuc ku saleysan; shaqo gelin ah); iyo
 - Inta ay dadku shaqeeyaan (waqti-dhiman; shaqo wadaag ama kala-goosi shaqo; fasax aan mushaar lahayn).
- Jirista siyaasad shaqo oo dabacsan:
 - Dhiirrigeli shaqeynta dabacsan marka ay habboon tahay oo macquul tahay;
 - Sii qof kasta fursad adoo loo eegayn duruufaha loo codsanayo oo u tixgeli qabanqaabo shaqo dabacsan oo codsiyada ha looga jawaabo 28 maalmood gudahooda;
 - Dib-u-eegis joogto ah oo loogu talagalay qabanqaabo shaqada dabacsan.
- U soo dhejinta dhammaan shaqooyinka si cad oo ku saabsan suurtagalnimada dabacsanaanta shaqo bilowga hore.

Mushaarka Dhabta ah ee Lagu Noolaado

Xubnaha Axdiga waxaa laga filayaa inay keenaan caddeyn:

Ogeysiis: Shuruudan xubinnimada ayaa bixinaysa bayaanka habdhaqanka ugu wanaagsan oo shuruudda qoran sharci ahaan ma ku qabanayso.

- U muuji shaqaalaha bixinta Mushaarka Dhabta ah ee Lagu Noolaado iyo faahfaahinada siinta qandaraasleyaashooda mushaarka lagu noolaado, sida ay qeexeen Mu'asasada Mushaarka Lagu Noolaado (Living Wage Foundation).

Kaqeybgalinta & Codka

Xubnaha Axdiga waxaa laga fili doonaa inay keenaan caddeynta shaqaale isku kalsoon, oo awood leh taasoo ka dhex abuurtay xiriir wax-ku-ool ah oo ka dhexeeya shakhsiyadka, shaqaalaha iyo maamulka halkaasoo

fikradaha si badqab leh loo dhageysto oo loo wadaago iyadoo loo marayo:

- Ku lug lahaanshaha shaqaalaha go'aan gaarista iyo maaraynta isbeddelka iyadoo loo marayo wadaxiriir iyo la-talin wax-ku-ool ah.
 - Saarista dadaal badan dhegeysiga sida hadalka.
 - Shaqobixiyeyaal si firfircoon u raadinaya aragtiyo, oo tixgelinaya waxa ay ka maqlaan shaqaalaha, oo wadaxiriir joogto ah kala sameynayo wax ku saabsan ku soo biirinta shaqaalaha hor u sii wadidda hay'adda.
 - Hubinta in maareeyayaasha dhammaan heerarka ay ka go'an tahay inay fikradahooda dhiibtan
 - Si dhab ah uga fiirsashada aragtiyada shaqaalaha kahor intaan go'aanno la gaarin
 - Ula xiriirida iyo la-tashiga shaqaalaha si nidaamsan oo joogto ah
- Ula falgalka si wanaagsan ururrada shaqaalaha, oo ay ku jiraan:
 - U oggolaanshaha gelitaanka goobta shaqada qabanqaabiyayaasha ururrada shaqaalaha
 - U sheegida shaqaalaha cusub xubinimada suurtoogalka ah ee ururka shaqaalaha
 - Si ikhtiyaar ah u aqoonsashada urur(-rada) shaqaal-e(-aha) haddii ay suurtoogal tahay
 - Siinta tas'hiilaad iyo waqti ku filan waajibaadyada, tababarka iyo hawlaha ururka shaqaalaha
 - Inaadan raadin ka noqoshaqada aqoonsiga urur(-ro) shaqaal-e(-aha) ama aadan baabi'in hab gorgorton oo wadajir ah
 - Hirgeli shardiyaada iyo shuruudaha sida wadajirka ah loogu heshiiyay
 - Kaqeybqaado qabanqaabooyinka gorgortanka wadajirka ah marka ay jiraan
 - Hirgeli caadooyinka si wadajir ah loogu heshiiyey waaxda haddii ay suurtoogal tahay

Shaqaaaleynta

Xubnaha Axdiga waxaa laga fili doonaa inay keenaan caddeynta sawirashada shaqaaleynta shaqaale kala duwan

oo kala leh hibooyin kala duwan oo ka kala socda bulshooyinka Greater Manchester oo dhan iyadoo loo marayo:

- Geedi-socodyo xulasho oo loogu talagalay inay meesha ka saaraan eexda aan laga warqabin;
- Habdhaqanno shaqaaleyn oo caddaaladd ah oo loo dhan yahay oo ay arrimaha sinnaanta iyo kala duwanaanshaha oo dhan ay ka mid yihiin;
- Geedi-socodyo shaqaaleynoo qarsoodi ah, oo ay ka mid yihiin qorshaha kalsoonida naafada (ama kuwa u dhigma) oo la jaan qaada ololaha 'mamnuuc sanduuqa' (ban the box) (ka saarista sanduuqa diiwaanka dambiileyaasha foomamka codsiyada, ama kuwa u dhigma);
- Xayeysiinada shaqo ee qeexaya suurtagalnimada shaqeynta dabacsan ee doorka iyo tirada saacadaha la shaqeynayo (ka eeg Shaqo Sugan);
- Maareeyayaasha shaqaaleynta inay dhammeeyeen tababarka sinnaanta iyo kala duwanaanshaha;
- Hababka shaqaaleyn ee ku habboon doorka iyo loollamaha – tusaale ahaan habab waafaqsan wadaxiriirka, wareysiyada iyo hawlaha kale;
- Geedi-socodyo shaqaaleyn, oo ay ku jiraan xayeysiinta doorka, kuwaasoo si firfircoon u dhiirrigeliya shaqaaleynta shaqaale kala duwan;
- La socoshada kala duwanaanshaha shaqaalahooda si loo fahmo isbeddelka dabecada iyo horusocodka ku aadan kala duwanaanshaha weyn.

Ogeysiis: Shuruudan xubinnimada ayaa bixinaysa bayaanka habdhaqanka ugu wanaagsan oo shuruudda qoran sharci ahaan ma ku qabanayso.

Maamulida Dadka

Xubnaha Axdiga waxaa laga filayaa inay keenaan caddeyn ah:

- Qiyamyada urureed iyo dabecadaha la filayo oo cad oo la jaanqaada qiyamyada, kuwaasoo si cad loo muujiyo oo si kalsooni leh u qeexayaan shaqaalaha;
- Hogaamiyeyaasha iyo maareeyayaasha waxay sameeyeen dhaqan xaqiijinaya in shaqaalaha oo dhan ay ku raaxeystaan khibrad nololeed wanaagsan;
- Ujeeddooyinka shaqsiyeed ee la jaanqaada qiyamyada urureed iyo ujeeddooyinka guud;
- Qaabdhismeedka maareynta waxqabadka ee leh wadhadalka fool-kafoolka ah 1:1 ee lala yeesho maareeyayaasha;
- Horumarin urureed/qorshe tababar kaasoo xaqiijinaya in dhammaan shaqaalaha (oo ay ku jiraan maareeyaasha) ay helaan tababar munaasab ah, inta lagu gudajiro waqtiga shaqada mushaarka leh, si ay ugu suurtagasho inay shaqadooda si qabtaan si wax-ku-ool leh, iyagoo horumarinaya oo adeegsanayo xirfadahooda iyo waayo aragnimadooda;
- Fursado horumarineed oo lagu taageerayo himilooyinka horusocoshada;
- Jawaab-celin iyo sahanno ka socda dhowr il oo tilmaamaya inay shaqaaluhu dareemaan in la qiimeeyay, waqti la geliyay oo la horumariyey;
- Haybta doorka mareeyaha kaasoo la sameeyo muddo si la maareeyo shaqaalaha;
- Barnaamijka laqabsashada ururka;
- Geedi-socodyada cabashada iyo edbinta ee waafaqsan hagista ACAS;
- Hoggaamiyeyaasha ka difaacaya shaqaalaha xoog u sheegashada iyo handadaada.

Caafimaadka & Fayoqabka

Xubnaha Axdiga waxaa laga fili doonnaa inay taageeraan qof walba inuu noqdo shaqaale wax-soo-saar leh, iyagoo aqbalaya in shaqaalaha oo dhan ay yihiin shaqsiyaad baahiyo kala duwan leh, iyagoo bixinaya caddeyn ah:

- Ka go'naashaha hoggaamiyeyaasha sare sidii loo horumarin lahaa dhaqan kaasoo shaqaaluhu isku saarayaan awoodda qaadidda mas'uuliyada doorkooda shaqsiyeed ee la xiriirta sameynta goob shaqo oo caafimaadqab iyo wax-soo-saar leh;
- Nidaamyo lagu kormeerayo fayoqabka shaqaalaha ee leh shuruudda ka jawaab-celinta natiijooyinka dhabta ah ee la taaban karo;
- Qirida heerarka noloshaha ee kala duwan iyo taageerida shaqaalaha si ay ugu dhex baraaraab jawigooda shaqo, oo ay ku jirto u sixitaanka shaqada dadka qaba cudurrada raaga iyo dadka laxaadka la';
- Qirida in caafimaadka maskaxdu tahay arrin caafimaad iyo fayoqab oo u baahan in la tixgeliyo sida la xiriirto qiyamyada iyo himilooyinka guud ee ururka, iyadoo xeeladaha ku xiran yihiin dib-u-eegis joogto ah;
- Maareeyayaasha ka leh ujeeddo gaar ah ka wadhadalka fayoqabka shaqaalaha, ee taageero diyaar u tahay si ay u fududeeyaan tababbarka socda iyo habdhaqanka wanaagsan;
- Adeegyada taageerada gudaha iyo/ama dibedda ee loogu talagalay shaqaalaha si ay u helaan mar alla marka ay u baahan yihiin iyo maareynta ku maqnaashada jirro sida waafaqsan ACAS ama tilmaamaha u dhigma.

Tallaabooyinka Xiga

Si aad ugu lug lahaato Axdiga oo aad isku diiwaangeliso Taageere ahaan, fadlan kala xiriir kooxda Axdiga barta contact@gmgoodemploymentcharter.co.uk ama booqo www.GMgoodemploymentcharter.co.uk

Ogeysiis: Shuruudan xubinnimada ayaa bixinaysa bayaanka habdhaqanka ugu wanaagsan oo shuruudda qoran sharci ahaan ma ku qabanayso.